




# DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

## XAFIISKA XISAABIYAHA GUUD

	2020	2021	2022	2023	2024
Tax Revenue	139,529,217	162,766,910	181,691,842	224,631,762	266,763,916
Other Revenue	71,704,628	66,794,410	80,977,903	104,859,950	102,589,875
Total Domestic Revenue	\$ 211,233,845	\$ 229,561,321	\$ 262,669,745	\$ 329,491,711	\$ 369,353,791

### WARBIXINTA FULINTA MIISAANIYAD SANNADEEDKA - BISHA FEBRAAYO 2026

Domestic Revenue Vs External Grants



Jaantuska 2aad: Dhabta Dakhliga Canshuurta Jan 2025



APRIL 2026

# WARBIXINTA FULINTA MIISAANIYADDA

Bisha Febraayo 2026

WAXAA SOO SAARAY WARBIXINTAAN

**XAFIISKA XISAABIYAHA GUUD EE DAWLADDA**

WAXAAD KA HELI KARTAAN WARBIXINTAAN BOGGA XAFIISKA XISAABIYAHA  
GUUD

[www.oags.gov.so](http://www.oags.gov.so)

Dhismaha Wasaaradda Maaliyadda  
Degmada Shangani  
Mogadishu – Somalia  
Email: [reporting@oags.gov.so](mailto:reporting@oags.gov.so)

## TUSMADA WARBIKINTA

<b>TUSMADA WARBIKINTA .....</b>	<b>iii</b>
<b>HORDHAC .....</b>	<b>1</b>
<b>DHABTA DAKHLIGA IYO MIISAANIYADDA SANNADKA 2026.....</b>	<b>2</b>
<b>DAKHLIGA DAWLADDA BISHA FEB 2026 &amp; 2025 .....</b>	<b>3</b>
DAKHLIGA CANSHUURAHHA.....	5
DAKHLIYADA KALE .....	7
<b>DEEQAHA DIBADDA .....</b>	<b>7</b>
<b>DHABTA KHARASHAADKA JAN-FEB IYO MIISAANIYADDA SANNADKA 2026.....</b>	<b>9</b>
<b>DHABTA KHARASHAADKA BILAHA JAN ILAA FEB, HAY'ADAHA DAWLADDA .....</b>	<b>13</b>
<b>KHARASHAADKA JOOGTADA AH .....</b>	<b>13</b>
<b>KHARASHAADKA MASHAARIICDA.....</b>	<b>13</b>
<b>Lifaaqa 1<sup>aad</sup>: Faahfaahinta Dhabta iyo Miisaaniyadda Kharashaadka Joogtada ah Jan-Feb.....</b>	<b>15</b>
<b>Lifaaqa 2<sup>aad</sup>: Faah-faahinta Dhabta iyo Miisaaniyadda Kharashaadka Mashaariicda Jan-Feb 2026.....</b>	<b>51</b>
<b>Lifaaqa 3<sup>aad</sup>: Soo koobid Dhabta iyo Miisaaniyadda Kharashaadka Mashaariicda Ee Hay'adaha Jan-Feb, 2026.....</b>	<b>72</b>

## Liiska Jaantusyada

Jaantuska 1 <sup>aad</sup> : Dhabta Dakhliga Dawladda – Bisha Feb 2026 & 2025.....	4
Jaantuska 2 <sup>aad</sup> : Dakhliga Gudaha – bilaha Jan-Feb 2026 & 2025 .....	4
Jaantuska 3 <sup>aad</sup> : Qaybaha Dakhliga Gudaha Feb 2026.....	5
Jaantuska 4 <sup>aad</sup> : Dakhliga Canshuuraha Jan-Feb 2026 & 2025.....	6
Jaantuska 5 <sup>aad</sup> : Deeqaha Dibadda Jan-Feb 2026 & 2025 .....	8
Jaantuska 6aad: Kharashaadka Joogtada ah Jan-Feb, 2025-2026 .....	10
Jaantuska 7 <sup>aad</sup> : Kharashaadka Mashaariicd, Jan & Feb - 2025-2026.....	11

## Liiska Shaxaha

Shaxda 1 <sup>aad</sup> : Dhabta iyo Miisaaniyadda Dakhliga Jan-Feb 2026 .....	2
Shaxda 2 <sup>aad</sup> : Dhabta Dakhliga Feb 2026 & 2025.....	3
Shaxda 3 <sup>aad</sup> : Iskubiirinta Dakhliga Gudaha ee Jan-Feb ee sannadaha 2026 & 2025.....	5
Shaxda 4 <sup>aad</sup> : Deeqaha Dibadda Jan-Feb 2026 iyo 2025.....	7
Shaxda 5 <sup>aad</sup> : Dhabta & Miisaaniyadda Kharashaadka Guud Dawladda Jan-Feb 2026, .....	9
Shaxda 6 <sup>aad</sup> : Kharashaadka la bixiyey Bisha February 2026 iyo 2025.....	11
Shaxda 7 <sup>aad</sup> : Iskudarka Kharashaadka la bixiyey Jan- feb 2026 & 2025.....	12
Shaxda 8 <sup>aad</sup> : Dhabta Kharashaadka, Hay'adaha Dawladda.....	13

## **HORDHAC**

Warbixinta fulinta miisaaniyadda waa warbixin bille ah, waxayna faahfaahinaysaa fulinta ama dhaqangelinta miisaaniyad sannadeedka 2026. Waxayna isbarbardhig ku samaynaysaa dakhliga dhabta ah ee lasoo uruuriyey iyo kharashaadka Dawladda ee la bixiyey sannadka gudihiisa iyo miisaaniyad sannadeedka dakhliga iyo kharashaadka dawladda. Miisaaniyadu waxay waafaqsan tahay miisaaniyad sannadeedka 2026 oo ay ansixiyeen labada aqal ee baarlamaanka.

Wadarta Dakhliga Gudaha ee miisaaniyad sannadeedka 2026 ayaa ah **\$479M** wuxuuna ka yahay **35%** wadarta miisaaniyadda dakhliga Dawladda, halka wadarta deeqaha dibadda oo isugu jirta kab miisaaniyaddeed iyo mashaariic ee ku jiray miisaaniyadda ay tahay **\$879M** oo **65%** ka ah wadarta dakhilga miisaaniyad sannadeedka 2026.

Wadarta kotalagalka miisaaniyadda ee Kharashaadka Joogtada ah ayaa ah **\$682M** waxayna ka tahay **49%** wadarta miisaaniyadda kharashaadka guud, halka kotalagalka miisaaniyadda kharashaadka mashaariicda ay tahay **\$704M** waxayna ka tahay **51%** wadarta miisaaniyadda kharashaadka guud ee sannadka 2026.

Iskudarka Dakhliga Gudaha ee la helay bilaha Janaayo ilaa Febraayo 2026 ayaa ahayd **\$67M** wuxuuna ka badan yahay **14%** iskudarka dakhliga gudaha ee la helay Bilaha Janaayo ilaa Febraayo 2025. Sidoo kale iskubiirinta deeqaha dibadda ee la helay bilaha Janaayo ilaa Febraayo 2026 ayaa ahayd **\$30M** waxayna ka yartahay **2%** iskubiirinta deeqaha dibadda la bilaha Janaayo ilaa Febraayo 2025.

Wadarta miisaaniyadda kharashaadka guud ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa Febraayo 2026 ayaa ahayd **\$86M** waxayna kayar tahay **1%** wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa Febraayo ee sannad maaliyadeedkii hore ee 2025

Warbixintaan ayaa ka koobnaan doontaa saddex qaybood. Qaybta koowaad ee warbixinta fulinta miisaaniyadda oo lagu faahfaahin doonaa dhabta dakhliga Dawladda; Dakhliga Gudaha iyo Deeqaha Dibadda, iyadoo la isbarbardhigi doono dhabta dakhliga iyo miisaaniyad sannadeedka qaybaha dakhliga Dawladda ka kooban tahay.

Qaybta labaad ee warbixinta waxaa lagu faahfaahin doonaa kharashaadka dawladda ee la bixiyey billaha Janaayo ilaa Febraayo 2026, Iyadoo loo fiirinaayo waafaqsanaanta sida loogu ansixiyey miisaaniyad sannadeedka 2026. Waxaana loo kala qaadi doonaa kharashaadka dawladda labo qaybood; kharashaadka Joogtada ah iyo kharashaadka mashaariicda.

Warbixinta qaybta saddexaad waxaa ku lifaaqan faahfaahinta isticmaalka miisaaniyadda ee hay'adaha dawladda, loona kala qaaday sida ay hay'adaha u fuliyeen kharashaadka joogtada ah iyo mashaariicda ee miisaaniyad sannadeedka 2026. Lifaaqa koowaad ayaa lagu soo bandhigi doonaa shax faahfaahsan ee isticmaalka hay'adaha ee miisaaniyadda kharashaadka joogtada ah, lifaaqa labaad ayaa lagu soo bandhigi doonaa doonaa shaxda isticmaalka hay'adaha ee kharashaadka miisaaniyadda mashaariicda 2026. Lifaaqa 3<sup>aad</sup> soo koobid fulinta mashaariicda.

## DHABTA DAKHLIGA IYO MIISAANIYADDA SANNADKA 2026

Wadarta dakhliga ee miisaaniyadda asalka ayaa ah \$ **1,357,811,103** oo la filayo in ay Dawladda soo uruuriso sannad maaliyadeedka 2026 gudihiisa. Miisaaniyada Dakhliga Gudaha ayaa ahayd \$ **478,974,645** oo **35%** ka ah wadarta miisaaniyad sannadeedka, halka deeqaha dibada la filayo in la soo xareeyo ay tahay \$ **878,836,458** oo **65%** ka ah wadarta miisaaniyadda dakhliga ee sannadka 2026.

	Faah-Faahin	Dhabta Feb 2026	Dhabta Jan-Feb 2026	Kutalagalka Miisaaniyadda	% Fulinta
	<b>Canshuuraha</b>				
111	Canshuurta Dakhliga & Faa'iidoyinka	4,710,584	8,182,010	53,262,627	15%
114	Canshuurta Adeegga & Agabka	4,578,364	10,524,362	77,001,675	14%
115	Canshuurta Ganacsiga Dibadda	14,795,282	29,297,674	182,424,346	16%
116	Canshuuraha Kale	632,651	961,901	14,412,241	7%
	<b>Wadarta Canshuurta</b>	<b>24,716,881</b>	<b>48,965,948</b>	<b>327,100,889</b>	<b>15%</b>
	<b>Dakhliyada Kale</b>				
141	Dakhliga Hantida	-	-	3,244,397	0%
142	Dakhliga libka Agabka iyo Adeegga	9,186,521	18,144,276	145,284,670	12%
143	Ganaaxa, Ciqaabta iyo Luminta Dacwadaha	169,960	182,063	1,089,067	17%
145	Kharashka, Khidmadaha, iyo Sheegashooyink	-	-	2,255,623	0%
	<b>Wadarta Dakhliyada Kale</b>	<b>9,356,482</b>	<b>18,326,339</b>	<b>151,873,756</b>	<b>12%</b>
	<b>Wadarta Dakhliga Gudaha</b>	<b>34,073,363</b>	<b>67,292,287</b>	<b>478,974,645</b>	<b>14%</b>
	<b>DEEQAHA DIBADDA</b>				
131	Deeqaha laba dhinac	-	-	27,000,000	0%
132	Deeqaha Dhincayada badan	20,162,840	30,193,966	851,836,458	4%
	<b>Wadarta Deeqaha Dibadda</b>	<b>20,162,840</b>	<b>30,193,966</b>	<b>878,836,458</b>	<b>3%</b>
	<b>Wadarta Dakhliga Dawladda</b>	<b>54,236,203</b>	<b>97,486,253</b>	<b>1,357,811,103</b>	<b>7%</b>
32	<b>Hantida Maaliyadeed</b>				
321	Hantida Maaliyadeed	459,489	842,215	-	0%
	<b>Wadarta Hantida Maaliyadeed</b>	<b>459,489</b>	<b>842,215</b>	<b>-</b>	<b>0%</b>
	<b>Wadarta Lacag Qabashada Guud</b>	<b>\$ 54,695,692</b>	<b>\$ 98,328,468</b>	<b>-</b>	<b>0%</b>

Shaxda 1<sup>aad</sup>: Dhabta iyo Miisaaniyadda Dakhliga Jan-Feb 2026

Shaxda 1<sup>aad</sup> waxay soo bandhigaysaa dhabta dakhliga ee la soo uruuriyey bilaha Janaayo iyo Febraayo ee miisaaniyad sannadeedka 2026. Wadarta dakhliga la helay bilaha Janaayo iyo Febraayo ayaa ah \$**97.5M** oo u dhiganta 7% wadarta dakhliga miisaaniyad sannadeedka 2026. Dakhliga Gudaha waxaa ka soo xarooday \$**67M** una dhiganta 14% wadarta miisaaniyadda dakhliga gudaha, halka Deeqaha dibadda laga helay \$**30M** una dhiganta 3% wadarta deeqaha dibadda ee miisaaniyad sannadeedka 2026.

Wadarta dakhliga gudaha ee la helay bilaha Janaayo iyo Febraayo ayaa ahayd \$**67M** oo 69% ka ah wadarta dakhliga dawladda, halka deeqaha dibadda la helay \$**30M** oo 31% ka ah wadarta dakhliga dawladda ee miisaaniyad sannadeedka 2026. Dakhliga Canshuuraha ayaa lasoo uruuriyey \$**49M** oo u dhiganta 73% wadarta dakhliga gudaha ee la helay bilaha Jan iyo Feb 2026. Dakhliyada kale ayaa la helay \$**18M** oo 27% ka ah wadarta dakhliga gudaha ee la helay.

Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidada ayaa la helay bilaha Janaayo iyo Febraayo dakhli dhan \$**8M** oo u dhiganta 15% wadarta miisaaniyad sannadeedka canshuurtaan. Canshuurta Agabka iyo Adeegga ayaa la soo uruuriyey \$**11M** oo ah 14% miisaaniyadda sannadka, Sidoo kale Canshuurta Ganacsiga Dibadda ayaa lasoo uruuriyey \$**29M** oo u dhiganta 16% wadarta miisaaniyad sannadeedka 2026 ee canshuuraha ganacsiga dibadda. Canshuuraha kale ayaa la helay \$1M una dhiganta 7% wadarta miisaaniyad sannadeedka canshuuraha kale ee sannadka 2026.

Dakhliyada kale waxaa la soo uruuriyey bilaha Jan iyo Feb 2026 dakhli dhan \$ **18M** oo u dhiganta 12% miisaaniyad sannadeedka 2026 ee dakhliyada kale.

Deeqaha dhinacyada badan waxaana la helay bilaha Janaayo iyo Febraayo deeq dhan \$**30M** oo u dhiganta 4% miisaaniyad sannadeedka 2026 ee deeqaha dhinacyada badan.

Wadarta dakhliga Hantida Maaliyadeed ee la soo uruuriyey bilaha Janaayo iyo Febaraayo ayaa ahayd **\$842,215**. Waa dayn lasiiyo bangiyada ganacsiga si ay maalgalin ugu sameeyaan ganacsiyada yaryar ee dalka. Lacagta ka muuqata halkaan waa lacag celin ay sameeyaan bangiyada gaarka si waafaqsan heshiiska ay la geen hay'adda Gaargaar ee hoostagta Wasaaradda Maaliyadda.

### DAKHLIGA DAWLADDA BISHA FEB 2026 & 2025

Dakhliga Dawladda wuxuu ka soo xaroodaa dakhliga gudaha iyo deeqaha dibadda. Dakhliga Gudaha ayaa loo kala qaadaa dakhliga canshuuraha iyo dakhliyada kale. Shaxda 2<sup>aad</sup> waxay isbarbardhigaysaa dhabta dakhliga Dawladdu heshay bisha Feb ee sannadaha 2026 iyo 2025.


Faah-Faahin	Dhabta Dakhliga Feb 2026	Dhabta Dakhliga Feb 2025	Koror/ Naaqus
<b>Dakhliga Gudaha &amp; Deeqaha Dibadad</b>	<b>\$54,236,203</b>	<b>\$57,897,932</b>	<b>-6%</b>
<b>Dakhliga Gudaha</b>	<b>34,073,363</b>	<b>32,211,090</b>	<b>6%</b>
<b>Dakhliga Canshuuraha</b>	<b>24,716,881</b>	<b>22,959,808</b>	<b>8%</b>
Canshuurta Dakhliga & Faaiidooyinka	4,710,584	7,526,486	-37%
Canshuurta Adeegga & Agabka	4,578,364	3,357,044	36%
Canshuurta Ganacsiga Dibadda	14,795,282	11,427,653	29%
Canshuuraha Kale	632,651	648,625	-2%
<b>Dakhliyada Kale</b>	<b>9,356,482</b>	<b>9,251,282</b>	<b>1%</b>
Dakhliga Hantida	-	-	0%
Dakhliga Iibka Agabka iyo Adeegga	9,186,521	9,132,076	1%
Ganaaxa, Ciqaabta iyo Luminta Dacwadaha	169,960	119,206	43%
Kharashka, Khidmadaha, iyo Sheegashooyinka hadda jira aynu lee nahay	-	-	0%
<b>DEEQAHA DIBADDA</b>	<b>20,162,840</b>	<b>25,686,841</b>	<b>-22%</b>
Deeqaha laba dhinac laha	-	8,430,806	-100%
Deeqaha Dhincacyada badan	20,162,840	17,256,035	17%

Shaxda 2<sup>aad</sup>: Dhabta Dakhliga Feb 2026 & 2025

Sida ka muuqato shaxda 2<sup>aad</sup> dakhliga Dawladda ee la helay bisha Feb 2026 ayaa ahaa **\$54M**, wuxuuna ka yar yahay **6%** wadarta dakhliga Dawladda ee la helay bisha Febraayo 2025. Dakhliga gudaha ayaa la helay **\$34M** oo ka badan **6%** wadarta dakhliga gudaha ee la helay bisha Febaraayo 2025. Halka deeqaha dibadda la helay **\$20M** oo ay ka yar **22%** wadarta Deeqaha la helay bisha Febraayo 2025.

Canshuurta Agabka iyo Adeegga ayaa la soo uruuriyey bisha Feb 2026 dakhli dhan **\$5M** oo ka badan **36%** Canshuurta Agabka iyo Adeega ee la helay bisha Feb 2025. Kororka ugu badan ee canshuurtan waxay ka timid Canshuuraha Iibka - Canshuuraha Kale Ee Iibka ee la helay bisha Feb 2026.

Canshuurta Ganacsiga dibadda ayaa la helay \$15M bisha Febraayo 2026 waxayna ka badan tahay 29% canshuurta Ganacsiga dibadda ee la helay bisha Febraayo 2025. Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidadada iyo Canshuuraha kale ayaa la helay canshuur ka hoosaysa canshuurtii lasoo uruuriyey bisha Febraayo 2025.



Jaantuska 1<sup>aad</sup>: Dhabta Dakhliga Dawladda – Bisha Feb 2026 & 2025


Sida ka muuqata Jaantuska 1<sup>aad</sup> Dakhliga Gudaha ee la helay bisha Feb 2026 ayaa ahaa **\$34M** wuxuuna ka badan yahay **\$2M** dakhliga gudaha ee la helay bisha Febraayo 2025. Deeqaha dibadda ee la helay bisha Febraayo 2026 ayaa ah **\$20M** waxayna ka hooseesaa **\$6M** deeqaha dibadda ee la helay bisha Feb 2025.

Deeqaha dibadda ayaa laga kala helay: Bangiga Adduunka **\$14M**, Bangiga Hormarinta Afrika **\$354K**, Hay'adaha Qaramada Midoobay (UN) **\$1.3M**, Hay'adda Waxbarashada Adduunka (GPE) **\$5.4M** iyo Mashruuca Xoojinta Xogta Cilmi barista oo laga helay lacag dhan **\$25K**.

## DAKHLIGA GUDAHA

Odooroska miisaaniyad sannadeedka dakhliga gudaha ayaa ahayd **\$479M**, waxaana la helay bilaha Janaayo iyo Febraayo 2026 dakhli dhan **\$67** oo u dhiganta **14%** miisaaniyad sannadeedka dakhliga gudaha. Iskudarka Dakhliga Gudaha ee la helay bilaha Janaayo iyo Febraayo ee sannadka 2026 ayaa **6%** ka badan iskudarka dakhliga gudaha ee la helay bilaha Janaayo iyo Febraayo ee sannadka 2025.

Sida ka muuqata jaantuska 2<sup>aad</sup>, wuxuu muujinayaa isbarbardhiga dakhliga gudaha ee la helay bisha Febraayo ee sannadaha 2026 iyo 2025, Dakhliga gudaha ayaa kordhay Bisha Feb ee sannadka 2026, wuxuuna ka badan yahay **6%** dakhliga gudaha ee la helay bisha Feb 2025. Waxaana la helay dakhli dhan **\$34M**.



Jaantuska 2<sup>aad</sup>: Dakhliga Gudaha – bilaha Jan-Feb 2026 & 2025


Sida ka muuqata jaantusta 2<sup>aad</sup>, wuxuu muujinayaa isbarbardhiga dakhliga gudaha ee la helay bilaha Janaayo iyo Febraayo sannadaha 2026 iyo 2025.

Bisha Janaayo 2026 ayaa la helay **\$33M** oo ka **24%** ka badan dakhliga gudaha ee la helay bisha Janaayo 2026. Sidoo dakhliga gudaha ayaa kordhay Bisha Febraayo ee sannadka 2026, waxaana la helay **\$34M** oo ka badan **6%** dakhliga gudaha ee la helay bisha Febraayo 2025.

Dakhliga gudaha ayaa ka soo xaroodo dakhliga canshuuraha iyo dakhliyada kale.

Sida ka muuqato jaantuska 3<sup>aad</sup>, iskudarka dakhliga gudaha ee la helay bilaha Janaayo iyo Febraayo ee sannadka 2026, wuxuu **73%** kasoo xarooday dakhliga canshuuraha, halka **27%** kasoo xarooday dakhliyada kale.

Dakhliga canshuuraha ayaa ka soo xarooday canshuuraha kala duwan ay dawladdu qaado, waxaan ugu badan canshuurta kasoo xarooto dekada iyo garoonka diyaaraaha Magaalada Muqdishu.



Jaantuska 3<sup>aad</sup>: Qaybaha Dakhliga Gudaha Feb 2026

### DAKHLIGA CANSHUURAHA

Dakhliga Canshuuraha ayaa loo kala qaadaa 4 qaybood oo kale ah; Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidooyinka, Canshuurta Agabka iyo Adeegga, Canshuurta Ganacsiga Dibadda iyo Canshuuraha kale. Canshuurta ugu badan dakhliga gudaha ayaa ah Canshuurta Ganacsiga Dibadda.

### CANSHUURTA DAKHLIGA IYO FAA'IIDOOYINKA

Canshuuraha Dakhliga iyo Faa'iidooyinka, waxayna ka tahay **17%** dhabta Dakhliga Canshuuraha ee la helay bilaha Jan-Feb

sannadka 2026. Canshuurtaan ayaa laga qaadaa dakhliga soo gala qofka iyo shirkadaha, waxayna ka kala timaadaa, canshuurta mushaarka shaqaalaha Dawladda iyo kuwa gaarka ah, canshuurta dakhliga kirooyinka daaraha iyo Canshuurta Faa'iidada shirkadaha.

Iskubiirinta Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidooyinka ayaa ka hoosayso **18%** ee bilaha Jan-Feb sannadka 2026, waxaana la helay dakhli dhan **\$8M**, halka bilaha Janaayo iyo Febraayo ee sannadka 2025 la helay **\$10M** oo ka sareeyso lacag dhan **\$2M** canshuurta la helay bilaha Jan-Feb ee sannadka 2026.

Iskubiirinta Canshuurta Faa'iidada Shirkadaha ayaa hoos u dhacday bilaha Janaayo iyo Febraayo ee sannad maaliyadeed 2026, waxayna ka hoosaysaa **55%** wadarta Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidooyinka ee la helay bilaha Janaayo iyo Febraayo 2025. Sidoo kale canshuurta kirada daaraha ayaa la helay koror dhan **\$2M** ka saraysa **94%** wadarta Canshuurta kirada daaraha ee la helay bilaha Jan iyo Feb 2025. Canshuurta Mushaarka shaqaalaha ayaa laga helay **\$4M** bilah Jan iyo Feb ee sannadka 2026, waxayna ka badan 9% canshuurta mushaarka shaqaalah ee lahay bilaha Jan iyo Feb 2025.

Faah-Faahin	Dhabta Dakhliga Jan-Feb 2026	Dhabta Dakhliga Jan-Feb 2025	Koror/ Naaqus
<b>Dakhliga Gudaha</b>	<b>67,292,287</b>	<b>58,980,160</b>	<b>14%</b>
<b>Canshuuraha</b>	<b>48,965,948</b>	<b>41,782,318</b>	<b>17%</b>
Canshuurta Dakhliga & Faa'iidooyinka	8,182,010	9,953,373	-18%
Canshuurta Agabka & Adeegga	10,524,362	7,488,389	41%
Canshuurta Ganacsiga Dibadda	29,297,674	23,429,679	25%
Canshuuraha Kale	961,901	910,877	6%
<b>Dakhliyada Kale</b>	<b>18,326,339</b>	<b>17,197,843</b>	<b>7%</b>
Dakhliga Hantida	-	-	
Dakhliga Iibka Agabka iyo Adeegga	18,144,276	17,073,289	6%
Ganaaxa, Ciqaabta iyo Luminta Dacwadaha	182,063	124,553	46%
Kharashka, Khidmadaha, iyo Sheegashooyinka hadda jira aynu lee nahay	-	-	0%

Shaxda 3<sup>aad</sup>: Iskubiirinta Dakhliga Gudaha ee Jan-Feb ee sannadaha 2026 & 2025

## CANSHUURTA AGABKA IYO ADEEGGA

Waxaa la helay bilaha Jan iyo Feb 2026 dakhli dhan **\$11M** oo u dhigma koror dhan **41%** marka la babardhigo iskubiirinta Canshuurta Agabka iyo Adeega ee la helay bilaha Janaayo iyo Febraayo 2025. Waxayna ka tahay **21%** wadarta Dakhliga Canshuuraha. Waxaa laga qaadaa canshuurtaan ganacsiyada dalka waxaana ka mid ah; canshuurta gedista ee suuqyada, canshuurta wadamarista gawaarida iyo canshuurta gedista ee laga qaado shirkadaha bixiya adeegyada ganacsiga.


Canshuurta gadista ee badeecadaha kasoo daga dekadda iyo suuqyada ayaa laga helay bilaha Janaayo & Febraayo 2026 dakhli dhan **\$9M** oo u dhiganta **85%** wadarta Canshuurta Agabka iyo Adeega. Canshuuraha Wado-marist, iyo Nootaayooyinka ayaa laga helay **\$2M** oo u dhiganta **15%** wadarta Canshuurta Agabka iyo Adeegga ee la soo uruuriyey bilaha Jan & Feb 2026.

## CANSHUURTA GANACSIGA DIBADDA

Canshuurta Ganacsiga Dibadda waa canshuurta laga qaado badeecadaha kasoo daga Dekadda iyo Garoonka Diyaraadaha Muqdisho. Waana dakhliga ugu muhiimsan dakhliga Dawladda kasoo xarooda gudaha dalka. Bilaha Janaayo iyo Febraayo ee sannadka 2026 waxaa ka soo xarooday canshuur dhan **\$29M** oo u dhiganta **60%** wadarta Dakhliga Canshuuraha, wuxuuna ka yahay **44%** wadarta dakhliga gudaha ee la halay bilaha Janaayo iyo Febraayo sanadka 2026. Dakhliga la helay bilaha Janaayo iyo Febraayo ee sannadka 2026 ayaa sare u kac dhan **25%** sameeyey marka la barbardhigo wadarta dakhliga la helay bilaha Janaayo iyo Febraayo ee sannadka 2025.

## CANSHUURAH KALE

Miisaaniyad sannadeedka Canshuuraha kale ayaa ah **\$14M**, waxaana ka soo xarooday bilaha Jan iyo Feb 2026 dhakhli dhan **\$962K** oo u dhiganta **7%** wadarta Dakhliga Canshuuraha kale ee miisaaniyad sannadeedka 2026. Dakhliga la helay bilaha Jan iyo Feb 2026 ayaa **2%** ka aha wadarta dakhliga canshuuraha. Waxayna ka soo xarootaa canshuuraha laga qaado badqabka gawaarida, farankaboolada qaansheegooyinka ganacsiga ee adeegyada ama badeecadaha kasoo daga Dekadda iyo Garoonka Diyaarahadaha. Iskudarka Canshuuraha kale ee la soo uruuriyey bilaha Janaayo iyo Febraayo ee sannadka 2026 ayaa **6%** ka sarayso marka la barbardhigo iskubiirinta canshuuraha kale la helay bilaha Jan iyo Feb ee sannadka 2025.



Jaantuska 4<sup>aad</sup>: Dakhliga Canshuuraha Jan-Feb 2026 & 2025

Sida ka muuqato jaantuska 4<sup>aad</sup> oo soo bandhigaayo isbarbardhig qaybaha dakhliga canshuuraha ee la helay bilaha Janaayo iyo Febraayo ee sannadaha 2026 iyo 2025. Wuxuuna kaloo muujinayaa kororka iyo naaqska qaybaha dakhliga canshuuraha marka la is barbardhigayo dakhliga canshuuraha la helay bilaha Janaayo iyo Febraayo ee sannadaha 2026 iyo 2025.

## DAKHLIYADA KALE

Dakhliyada kale, waa dakhli ka soo xarooda adeegyada maamul oo ay bixiso Dawladda, sida bixinta shatiyada ganacsiga, adeegyada dekada iyo garoonka diyaaradaha, bixinta baasaboorada, iyo dalkugalka ajaanibta. Waxaana ka soo xarooday bilaha Janaayo iyo Febraayo 2026 dakhli dhan **\$18M** oo ka badan **7%** dakhliyada kale ee la helay bilaha Janaayo iyo Febraayo ee sannad maaliyadeedka 2025.

Dakhliyada kale ee lasoo uruuriyey bilaha Jan iyo Feb 2026, waxaa **\$9M** oo u dhiganta **46%** wadarta dakhliyada kale kasoo xarootay adeegyada maamul ee Dawladdu ka bixiso Dekadda iyo Groonka diyaaradaha magaalada Muqdisho. Bixinta Baasaboorada iyo dalkugalka ajaanibta waxaa ka soo xarooday dakhli dhan **\$3M** oo **14%** ka ah wadarta dakhliyada kale. Diyaaradaha mara hawada Soomaaliya waxaa laga helay **\$4M** oo u dhiganta **20%** wadarta Dakhliyada Kale ee la helay bilaha Jan iyo Feb 2026. Khidmaha Isgaarsiinta ayaa laga helay **\$2M** oo u dhiganta **11%** wadarta dakhliyada kale.

Sida ka muuqato shaxda 3<sup>aad</sup>, iskudarka dakhliga kasoo xarooday Ganaaxa iyo Ciqaabta ayaa kordhay **46%** bilaha Jan iyo Feb 2026, waxaana la helay dakhli dhan **\$182K**, halka bilaha Jan iyo Feb ee sannadka 2025 la helay dakhli dhan **\$125K**.

## **DEEQAHA DIBADDA**

Deeqaha Dibadda oo ka ah **65%** wadarta odoroska dakhliga miisaaniyadda Dawladda 2026, waxaa la helay **\$30M** oo u dhiganta **3%** miisaaniyad sannadeedka deeqaha dibadda. Wadarta deeqaha dibadda ee la helay bilaha Janaayo iyo Febraayo 2026 ayaa hoos uga dhacay **2%**, marka loo fiiriyo wadarta deeqaha dibadda ee la helay bilaha Janaayo iyo Febraayo 2025. Deeqaha dhinacyada badan ayaa la helay dakhli dhan **\$30M** kana badan **40%** deeqaha dhinacyada badan ee la helay bilaha Janaayo iyo Febraayo 2025.

Faah-Faahin	Dhabta Dakhliga Jan-Feb 2026	Dhabta Dakhliga Jan-Feb 2025	Koror/Naaqus
<b>DEEQAHA DIBADDA</b>	30,193,966	30,903,338	-2%
<b>Deeqaha laba dhinac</b>	-	9,357,980	-100%
Turkiga	-	7,500,000	-100%
Imaaraatka Carabta	-	1,857,980	-100%
<b>Deeqaha Dhinacyada badan</b>	30,193,966	21,545,358	40%
Bangiga Adduunka	23,111,034	19,692,689	17%
Bangiga Harumarinta Afrika	354,070	350,540	1%
Midowga Yurub	-	-	0%
Wadamada Dhoofiya Shidaalka (OPEC)	-	-	
Qaramada Midoobay	1292861	1,295,658	0%
Hay'ada Waxbarashada Addunnka (GPE)	5,411,051	206,471.30	2521%
Mashruuca Xoojinta Xogta Cilmi baarista	24,950.	-	


Shaxda 4<sup>aad</sup>: Deeqaha Dibadda Jan-Feb 2026 iyo 2025

Deeqaha dibadda waxay isugu jirtaa deeq kab miisaaniyadeed oo ay Dawladdu ka hesho hay'ado caalami ah iyo Dawladaha kabo miisaaniyadda Dawladda iyo kab mashaariic oo loogu talagalay in lagu maalgaliyo mashaariicda laga fuliyo dalka gudahiisa.

Sida ka muuqato shaxda 4<sup>aad</sup> Deeqaha dhinacyadda badan ee la helay bilaha Jan iyo Feb 2026 Bangiga Adduunka ayaa Dawladda ugu deeqay **\$23M** oo u dhiganta **76.5%** wadarta deeqda, Bangiga Horumarinta Afrika ayaa Dawladda ugu deeqday **\$354K** una dhiganta **1.2%** wadarta deeqda, Qaramada Midoobay ayaa laga helay deeq dhan **1M** una dhiganto **4.3%** wadarta deeqda,

Hay'ada Waxbarashada Addunnka (GPE) ayaa Dawladda ugu deeqday **5M** una dhiganto **17.9%** wadarta deeqaha dibadda ee la helay bilaha Janaayo iyo Febaraayo 2026.

Sidoo kale muuqaalka shaxda 4<sup>aad</sup> waxuu ku tusinayaa in Mashruuca Xoojinta Xogta Cilmi barista ay ka soo xarootay dakhli dhan **24K** bilaha Jan iyo Feb 2026.



Jaantuska 5<sup>aad</sup>: Deeqaha Dibadda Jan-Feb 2026 & 2025

Sida ka muuqato jaantuska 5<sup>aad</sup> oo soo bandhigaayo isbarbardhig deeqaha dibadda ee la helay bilaha Jan iyo Feb ee sannadaha 2026 iyo 2025.

Bisha Jan waxaa la helay deeq dhan \$10M oo 92% ka badan deeqda la helay bisha Jan 2025. Balse wuxuu hoos u dhacay deeqda la helay bish Feb 2026, waxaana la helay deeq dhan \$20M oo ka hooseeya 22% deeqda la helay bish Feb 2025.

## DHABTA KHARASHAADKA JAN-FEB IYO MIISAANIYADDA SANNADKA 2026

Kharashaadka Dawladda waxaa loo kala qaadaa, kharashaadka joogtada ah iyo mashaariicda. Kharashaadka joogtada ah waa kharashaadka Dawladda ee laga maalgaliyo dakhliga gudaha iyo kabka miisaaniyadeed oo ay Dawladdu ka hesho deeqaha dibabadda. Waxaa laga bixiyaa kharashaadka socodsiinta hawlaha Dawladda, sida mushaaraadka shaqaalaha, Isticmaalka Agabka iyo Adeegga ee hay'adaha Dawladda. Kharashaadka Mashaariicda waxaa laga maalgaliyaa kabka mashaariicda ee Dawladda ka hesho deeqaha dibadda.

	Faah-Faahin	Dhabta Feb 2025	Dhabta Jan-Feb 2026	Isbadalka Miisaaniyadda ee Kala wareejimaha	Kutalagalka Miisaaniyadda	% Fulinta
	<b>Kharashaadka Joogtada</b>					
21	Mushaarka Shaqaalaha	29,434,666	50,462,174	379,037,558	375,572,558	13%
22	Isticmaalka Agabka & Adeega	11,259,378	12,760,545	178,369,338	181,534,294	7%
24	Dulsaarka	922,665	922,665	6,715,000	7,000,000	14%
25	Kaalmo Dhaqaale	-	-	-	-	0%
26	Deeqaha	3,774,017	6,749,844	90,141,266	90,141,266	7%
27	Faa'idada Bulshada	-	-	10,000,000	10,000,000	0%
31	Hantida aan Maaliyadda Ahayn	37,925	37,925	18,125,622	18,140,666	0%
	<b>Wadarta Kharashaadka Joogtada</b>	<b>45,428,651</b>	<b>70,933,154</b>	<b>682,388,785</b>	<b>682,388,785</b>	<b>10%</b>
	<b>Kharashaadka Mashaariicda</b>					<b>0%</b>
21	Mushaarka Shaqaalaha	141,570	141,570	3,640,400	3,640,400	4%
22	Isticmaalka Agabka & Adeega	4,750,835	4,900,832	289,907,080	289,907,080	2%
25	Kaalmo Dhaqaale	-	-	8,660,000	8,660,000	0%
26	Deeqaha	7,801,688	7,801,688	169,426,273	170,096,273	5%
27	Faa'idada Bulshada	-	-	670,000	-	0%
28	Other expenses	-	-	34,105,110	34,105,110	0%
31	Hantida aan Maaliyadda Ahayn	1,851,994	1,851,994	198,009,595	198,009,595	1%
	<b>Wadarta Kharashaadka Mashaariicda</b>	<b>14,546,087</b>	<b>14,696,084</b>	<b>704,418,458</b>	<b>704,418,458</b>	<b>2%</b>
	<b>Wadarta Kharashaadka Guud</b>	<b>\$59,974,738</b>	<b>\$85,629,238</b>	<b>\$1,386,807,242</b>	<b>\$1,386,807,242</b>	<b>6%</b>

Shaxda 5<sup>aad</sup>: Dhabta & Miisaaniyadda Kharashaadka Guud Dawladda Jan-Feb 2026,

### KHARASHKA BISHA FEBRUARY 2026

Sida ka muuqato shaxda 5<sup>aad</sup> waxaa la bixiyey bisha February 2026 kharash dhan **\$60M**. Kharashaadka joogtada ah waxaa laga bixiyey **\$45M** oo u dhiganta **76%** wadarta kharashaadka guud, halka kharashaadka mashaariicdana laga bixiyey **\$15M** oo u dhiganta **24%** wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bisha February 2026.

Mushaarka shaqaalaha ayaa ugu badan kharashaadka la bixiyey bisha February waxaana la bixiyey **\$29M** oo u dhiganta **65%** wadarta kharashaadka joogtada ee la bixiyey. Kharashaadka Agabka iyo Adeegga ayaa la bixiyey **\$11M** oo u dhiganta **25%** wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha February 2026. Deeqaha la siiyo dawlad goboleedyada ayaa lagu bixiyey **\$4M** oo **8%** ka ah wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha February 2026.

Kharashaadka mashaariicda ayaa la bixiyey bisha Febraayo 2026 kharash dhan **\$15** oo u dhiganta **24%** wadarta kharashaadka guud. Mushaarka shaqaalaha, kharashaadka la bixiyey bisha February **\$142K** oo u dhiganta **0.97%** wadarta kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey. Kharashaadka Agabka iyo Adeegga ayaa lagu bixiyey **\$5M** oo u dhiganta **33%** wadarta kharashadka mashaariicda ee la bixiyey bisha February 2026.


Deeqaha la siiyo dawlad goboleedyada dalka ayaa lagu bixiyey **\$8M** oo u dhiganta **54%** wadarta kharashadka mashaariicda ee la bixiyey bisha February 2026.

## KHARASHAADKA GUUD JAN-FEB 2026

Iskudarka kharashaadka la bixiyey bilaha Janaayo iyo February 2026 ayaa ahaa **\$86M** oo u dhiganta **6%** miisaaniyadda kharashaadka guud ee sannadka 2026. Kharashaadka Joogtada ah ayaa la bixiyey **\$71M** oo u dhiganta **10%** kotalagalka miisaaniyadda sannadka ee kharashaadka joogtada ah, halka kharashaadka mashaariicda laga bixiyey **\$15M** oo u dhiganta **2%** kotalagalka miisaaniyadda kharashaadka mashaariicda ee sannadka 2026.

## KHARASHAADKA JOGTADA AH

Mushaaraadka shaqaalaha Dawladda ayaa lagu bixiyey **\$50M** oo u dhiganta **13%** kotalagalka miisaaniyad sannadeedka Mushaarka shaqaalaha ee miisaaniyadda kharashaadka joogtada ah, wuxuuna ka yahay **71%** wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bilaha Janaayo iyo February 2026. Kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeegga ayaa la bixiyey **\$13M** oo u dhiganta **7%** kotalagalka miisaaniyadda Isticmaalka Agabka iyo Adeegga ee kharashaadka joogtada ah, wuxuuna **18%** ka yahay wadarta kharashaadka joogtada ee la bixiyey. Kharashaadka soo iibsashadda hantida aan maaliyadda ahayn ayaa la bixiyey **\$38k** oo u dhiganta **0.2%** kotalagalka miisaaniyadda sannadka ee kharashaadka joogtada ah, waxayna ka tahay **0.05%** wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa February 2026.



Jaantuska 6<sup>aad</sup>: Kharashaadka Joogtada ah Jan-Feb, 2025-2026


Sida ka muuqato jaantuska 6<sup>aad</sup> oo soo bandhigaya isbarbardhig kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bilaha Jan iyo Feb ee sannadaha 2026 & 2025.

Bisha Jan 2026 waxaa la bixiyey kharashaadka joogtada ah \$26M oo ka badan 9% kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha Janaayo 2025.

Waxaa la bixiyey bisha Febraayo 2026 Kharash dhan \$45M oo 17% ka hoosayso kharashaadka joogtada ee la bixiyey bisha Febraayo 2025.

## KHARASHAADKA MASHAARIICDA

Iskudarka Kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bilaha Janaayo iyo Febraayo ayaa ahayd **\$15M** oo u dhiganta **2%** kotalagalka miisaaniyadda sannadka ee kharashaadka mashaariicda. Kharashaadka Musharka Shaqaalaha ayaa la bixiyey **\$142k** oo u dhiganta **4%** kotalagalka miisaaniyadda sannadka ee mushaaraadka, waxayna ka tahay **1%** wadarta kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bilaha Janaayo iyo Febraayo 2026. Kharashaadka Agabka iyo Adeegga ayaa la bixiyey **\$5M** oo u dhiganta **2%** miisaaniyadda sannadka, waxayna ka tahay **33%** wadarta kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bilaha Janaayo iyo Febraayo 2026. Kharashaadka Deeqaha ayaa la bixiyey **\$8M** oo u dhiganta **5%** kotalagalka miisaaniyadda sannadka, waxayna ka tahay **53%** wadarta kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bilaha Janaayo iyo Febraayo 2026.



Jaantuska 7<sup>aad</sup>: Kharashaadka Mashaariicd, Jan & Feb - 2025-2026

kharashaadka mashaariicda lacag dhan \$15M oo 76% ka badan wadarta kharashaadka Mashaariicda ee la bixiyey bisha Febraayo sannadka 2025.

Sida ka muuqato jaantuska 7<sup>aad</sup>, oo isbarbardhig ku samaynaysa kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bilaha Janaayo iyo February ee sannadaha 2026 & 2025.

Bisha Janaayo ee sannadaha 2026 iyo 2025, mashaariicda lama bixint kharshaad muuqda, waxaana la bixiye kharash ka yar \$200K.

Balse bisha Feb waxaa la bixiyey kharashaad aad uga badan kharashaadka la bixiyey bisha Janaayo. Bisha Febraayo ee sannadka 2026 waxaa laga bixiyey

### ISBARBARDHIGA KHARASH BIXINTA BISHA FEBRUARY EE 2026 & 2025

Sida ka muuqato shaxda 6<sup>aad</sup> oo isbarbardhigaysa kharashaadkii la bixiyey bisha February ee sannadaha 2026 iyo 2025. Wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey ayaa hoos ugu dhacay (5)% bisha February 2026 marka la barbardhigo wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bisha February ee sannadka 2025.

	Faahfaahin	Dhabta Feb 2026	Dhabta Feb 2025	Increase/Decrease
	<b>Kharashaadka Joogtada</b>			
21	Mushaarka Shaqaalaha	29,434,666	35,179,605	-16%
22	Isticmaalka Agabka & Adeega	11,259,378	10,514,791	7%
24	Dulsaarka	922,665	919,882	0%
26	Deeqaha	3,774,017	2,142,613	76%
31	Hantida aan Maaliyadda Ahayn	37,925	6,109,584	-99%
	<b>Wadarta Kharashaadka Joogtada</b>	<b>45,428,651</b>	<b>54,866,474</b>	<b>-17%</b>
	<b>Kharashaadka Mashaariicda</b>			
21	Mushaarka Shaqaalaha	141,570	132,945	6%
22	Isticmaalka Agabka & Adeega	4,750,835	3,971,813	20%
25	Kaalmo Dhaqaale	-	83,908	-100%
26	Deeqaha	7,801,688	3,733,381	109%
31	Hantida aan Maaliyadda Ahayn	1,851,994	342,790	440%
	<b>Wadarta Kharashaadka Mashaariicda</b>	<b>14,546,087</b>	<b>8,264,837</b>	<b>76%</b>
	<b>Wadarta Kharashaadka Guud</b>	<b>\$59,974,738</b>	<b>\$63,131,312</b>	<b>-5%</b>

Shaxda 6<sup>aad</sup>: Kharashaadka la bixiyey Bisha February 2026 iyo 2025

Wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha February 2026 ayaa 17% hoos uga dhacday marka loo fiiriyo wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha February ee sannadka 2025. Kharashaadka mashariicda ayaa la bixiyey \$14.5M bisha Febraayo 2026, waxayna 76% ka badan tahay wadarta kharashaadka mashariicda ee la bixiyey bisha February 2025.

Kharashaadka joogtada, Mushaarka Shaqaalaha ee la bixiyey bisha February 2026 ayaa ahayd \$29M oo 16% oo ka hoosaysaa kharashaadka joogtada ee mushaarka shaqalaha ee la bixiyey bisha February 2025.

Kharashaadka Agabka iyo Adeegga ee la bixiyey bisha February 2026 ayaa ahaa **\$11M** oo **7%** ka sareeyaa kharashaadka Agabka iyo Adeegga ee la bixiyey bisha February 2025.

Dhammaan kharashaadka mashaariicda ayaa kordhay marka laga reebo kharashaadka kaalmo dhaqaale oo aan la bixin wax kharash ah sannadka 2026. Kharashadka Isticmaalka Agabka & Adeega ayaa kordhay **20%**, sidoo kale soo iibsashada Hantida aan Maaliyadda ahayn ayaa kordhay **440%**, marka la barbardhigo kharashaadka soo iibshadha Hantida aan Maaliyadda ahayn ee la bixiyey bisha February 2025.

### ISBARBARDHIGA KHARASH BIXINTA BILAHA JAN IYO FEB EE 2026 & 2025

Iskudarka kharashaadka Guud ee la bixiyey bilaha Janaayo iyo February 2026 ayaa wax yar ka yar kharashaadka guud ee la bixiyey bilaha Janaayo iyo February 2025. Kharashaadka joogtada ah ayaa hoos u dhacay **(9) %** halka kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey ay korhdeen **77%** marka la barbardhigo iskudarka kharashaadkii mashaariicda ee la bixiyey bilaha Janaayo iyo February 2025.

	Faahfaahin	Dhabta Jan-Feb 2026	Dhabta Jan-Feb 2025	Increase /Decrease
	<b>Kharashaadka Joogtada</b>			
21	Mushaarka Shaqaalaha	50,462,174	55,320,739	-9%
22	Isticmaalka Agabka & Adeega	12,760,545	11,963,538	7%
24	Dulsaarka	922,665	919,882	0%
26	Deeqaha	6,749,844	3,959,068	70%
31	Hantida aan Maaliyadda Ahayn	37,925	6,109,584	-99%
	<b>Wadarta Kharashaadka Joogtada</b>	<b>70,933,154</b>	<b>78,272,811</b>	<b>-9%</b>
	<b>Kharashaadka Mashaariicda</b>			
21	Mushaarka Shaqaalaha	141,570	132,945	6%
22	Isticmaalka Agabka & Adeega	4,900,832	3,992,539	23%
25	Kabka	-	83,908	-100%
26	Deeqaha	7,801,688	3,733,381	109%
31	Hantida aan Maaliyadda Ahayn	1,851,994	342,790	440%
	<b>Wadarta Kharashaadka Mashaariicda</b>	<b>14,696,084</b>	<b>8,285,562</b>	<b>77%</b>
	<b>Wadarta Kharashaadka Guud</b>	<b>85,629,238</b>	<b>86,558,373</b>	<b>-1%</b>

Shaxda 7<sup>aad</sup>: Iskudarka Kharashaadka la bixiyey Jan- feb 2026 & 2025

Kharashaadka joogtada ah, Mushaaraadka shaqaalaha ayaa la bixiyey **\$50M** bilaha Janaayo iyo February 2026, waxayna **(9)%** ka hooseeyaa Mushaaraadka Shaqaalaha ee la bixiyey bilaha Janaayo iyo February 2025. Kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeegga ayaa la bixiyey **\$13M** oo **7%** ka sareeya kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeegga ee la bixiyey bilaha Janaayo iyo February 2025. Sidoo kale deeqaha la siiyo dawlad goboleedyada dalka ayaa lagu bixiyey \$7M bisha bilaha Janaayo iyo Febraayo oo 70% ka badan deeqaha la bixiyey bilaha Janayo iyo Febraayo 2025.

Kharashaadka Maashaariicda waxaa la bixiyey **\$15M** bilaha Jan iyo Feb 2026, waxayna ka saraysaa **77%** wadarta kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bilaha Jan iyo Feb 2025. Soo iibshadaha hantida aan maaliyadda ahayn ayaa lagu bixiye \$2M oo **440%** ka badan marka la barbardhigo kharashaadkii soo iibshada Hantida aan Maaliyadda aheyn ee la bixiyey bilaha Janaayo iyo February 2025.

Deeqaha la siiyo dawlad goboleedyada ayaa la bixiyey \$8M oo **109%** ka badan kharashaadka Deeqaha ee la bixiyey bilaha Jan-Feb 2025.

## DHABTA KHARASHAADKA BILAHA JAN ILAA FEB, HAY'ADAHA DAWLADDA

Shaxda 8<sup>aad</sup> waxaa ka muuqdo dhabta kharashadka guud ee Dawladda ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa February 2026, iyadoo loo kala saarayo sida ay u isticmaaleen qaybaha shaqo ee loo kala qaybiyo hay'adaha Dawladda. Sidoo kale kharashaadka waxaa loo kala qaaday kharashaadka joogtada ah iyo mashaariicda. Bilaha Janaayo ilaa February 2026, waxaa la bixiyey kharash dhan **\$86M** oo u dhigma **6%** wadarta miisaaniyad sannadeedka kharashaadka Guud ee Dawladda.

Faah-faahinta	Dhabta Kharashka Feb 2026	Dhabta Kharashka Jan-Feb 2026	Isbadalka Miisaaniyadda ee Kala wareejimaha	Kutalagalka Miisaaniyadda	% Fulinta
<b>KHARASHKA GUUD</b>	<b>59,974,738</b>	<b>85,629,238</b>	<b>1,386,807,242</b>	<b>1,386,807,242</b>	<b>6%</b>
<b>Kharashaadka Joogtada</b>	<b>45,428,651</b>	<b>70,933,154</b>	<b>682,388,785</b>	<b>682,388,785</b>	<b>10%</b>
Hay'adaha Adeeg Maamulka	15,273,022	23,289,792	293,026,361	297,383,037	8%
Hay'adaha Adeeg Amniga	22,628,764	39,391,798	275,536,154	271,333,393	14%
Hay'daha Adeeg Dhaqaalaha	3,588,935	4,055,592	49,963,874	49,809,959	8%
Hay'adaha Adeeg Bulshada	3,937,930	4,195,972	63,862,395	63,862,395	7%
<b>Kharashaadka Mashaariicda</b>	<b>14,546,087</b>	<b>14,696,084</b>	<b>704,418,458</b>	<b>704,418,458</b>	<b>2%</b>
Hay'adaha Adeeg Maamulka	3,412,396	3,448,490	154,906,604	154,906,604	2%
Hay'adaha Adeeg Amniga	-	-	-	-	0%
Hay'daha Adeeg Dhaqaalaha	7,038,180	7,134,466	345,474,219	345,474,219	2%
Hay'daha Adeeg Bulshada	4,095,510	4,113,128	204,037,635	204,037,635	2%

Shaxda 8<sup>aad</sup>: Dhabta Kharashaadka, Hay'adaha Dawladda

### KHARASHAADKA JOOGTADA AH

Kharashka ugu badan waxaa laga bixiyey miisaaniyadda kharashaadka joogtada ah, waxaana la bixiyey kharash dhan **\$71M** oo u dhiganta **10%** wadarta miisaaniyad sannadeedka kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bilaha Janaayo iyo February 2026. Kharashaadka joogtada ee la bixiyey ayaa ka ahaa **83%** ka ahaa wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa February 2026.

Iskudarka bilaha Janaayo iyo February ayaa Hay'adaha Amniga lagu bixiyey **\$39M** oo u dhiganta **14%** miisaaniyadda sannadka ee kharashaadka joogtada ah. Miisaaniyada Hay'adaha Adeegga Maamulka ayaa laga bixiyey **\$23M** oo u dhiganta **8%** miisaaniyad sannadeedka kharashaadka joogtada ah ee Hay'adaha Adeegga Maamulka. Hay'adaha Dhaqaalaha ayaa lagu bixiyey **\$4M** oo u dhiganta **8%**, Hay'adaha Bulshada ayaa lagu bixiyey **\$4M** oo u dhiganta **7%** miisaaniyad sannadeedka Hay'adaha Bulshada.

Kharashaadka ugu badan ee miisaaniyadda kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bilaha Janaayo iyo February 2026 waxaa lagu bixiyey Hay'adaha Adeegga Amniga, waxaana ku baxday, **\$39M** oo **56%** ka ah wadarta kharashaadka joogtada ee la bixiyey bilaha Janaayo iyo February 2026. Hay'adaha Maamulka ayaa lagu bixiyey kharash labaad ee ugu badan waxaana ku baxday **\$23M** oo **33%** wadarta kharashaadka joogtada ah, Ha'aydada Bulshada ayaa lagu bixiyey **\$4M** oo **6%** ka ah wadarta kharashaadka joogtada ah, halka Hay'adaha dhaqaalaha lagu bixiyey **\$4M** oo **6%** ka ah wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bilaha Janaayo iyo February 2026.

### KHARASHAADKA MASHAARIICDA

Kharashaadka Mashaariicda ayaa lagu bixiyey **\$15M** oo u dhiganta **2%** miisaaniyad sannadeedka kharashaadka mashaariicda, waxayna ka tahay **17%** wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa February 2026.

Mashaariicda hoos yimaado hay'adaha maamulka ayaa laga bixiyey **\$3M** oo u dhiganta **2%** miisaaniyadda mashaariicda ee hay'adaha Maamulka. Mashaariicda hoos yimaada hay'adaha dhaqaalaha ayaa lagu bixiyey **\$7M** oo u dhiganta **2%** miisaaniyada mashaariicda ee hay'adaha dhaqaalaha. Hay'adaha Bulshada ayaa lagu bixiyey **\$4M** oo u dhiganta **2%** miisaaniyadda mashaariicda ee haya'daha bulsha.

## DHAMMAAD

**Lifaaqa 1<sup>aad</sup>: Faahfaahinta Dhabta iyo Miisaaniyadda Kharashaadka Joogtada ah Jan-Feb**

Madaxa	Faahfaahinada	Dhabta Jan-Feb	Isbadalka Miisaaniyadda ee Kala wareejimaha	Kutalagalka Miisaaniyadda	%
<b>010100</b>	<b>Xafiiska Madaxtooyada</b>	<b>1,005,882</b>	<b>12,597,366</b>	<b>12,417,366</b>	<b>8%</b>
<b>00000</b>	<b>Undefined</b>	<b>1,005,882</b>	<b>12,597,366</b>	<b>12,417,366</b>	<b>8%</b>
	<b>Mushaarka Shaqaalaha</b>	<b>622,597</b>	<b>6,504,072</b>	<b>6,504,072</b>	<b>10%</b>
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	155,179	938,328	938,328	17%
2113	Gunnyoin Lacag Cadaan ah	462,648	5,508,504	5,508,504	8%
2114	Kharashaadka kale ee Shaqaalaha	4,770	57,240	57,240	8%
	<b>Isticmaalka Agabka iyo Adeegga</b>	<b>383,285</b>	<b>6,060,523</b>	<b>5,880,523</b>	<b>6%</b>
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	-	1,425,000	1,425,000	0%
2221	Hawlaha Guud	26,957	323,492	323,492	8%
2222	Isgaarsiinta	-	-	-	0%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	61,494	737,959	737,959	8%
2224	Agabka iyo Alaabaha	1,558	18,700	18,700	8%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	-	36,000	36,000	0%
2231	Kirooyin	15,000	180,000	60,000	8%
2241	Kharashaadka Waxbarashada iyo Tababaradda	-	-	-	0%
2242	Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta	191,460	2,297,520	2,297,520	8%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	86,816	1,041,852	981,852	8%
	<b>Deeqaha</b>	<b>-</b>	<b>32,771</b>	<b>32,771</b>	<b>0%</b>
2621	Deeqaha Joogtada ee La Siiyo Hay'adaha Caalamiga ah	-	32,771	32,771	0%
<b>010201</b>	<b>Xafiiska Golaha Shacabka</b>	<b>2,383,494</b>	<b>28,004,201</b>	<b>28,004,201</b>	<b>9%</b>
<b>0102011</b>	<b>Governance and Administration (Lower House)</b>	<b>627,214</b>	<b>6,657,371</b>	<b>26,641,961</b>	<b>9%</b>
	<b>Mushaarka Shaqaalaha</b>	<b>482,595</b>	<b>3,674,760</b>	<b>22,437,960</b>	<b>13%</b>
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	349,975	2,167,080	2,167,080	16%
2113	Gunnyoin Lacag Cadaan ah	132,620	1,507,680	20,270,880	9%
2114	Kharashaadka kale ee Shaqaalaha	-	-	-	0%
	<b>Isticmaalka Agabka iyo Adeegga</b>	<b>144,619</b>	<b>2,066,936</b>	<b>3,288,326</b>	<b>7%</b>
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	-	-	562,500	0%
2221	Hawlaha Guud	20,291	295,250	295,250	7%
2222	Isgaarsiinta	-	-	-	0%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	40,960	491,520	245,760	8%
2224	Agabka iyo Alaabaha	19,599	235,200	117,600	8%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	20,959	251,526	45,116	8%
2231	Kirooyin	-	243,600	243,600	0%
2241	Kharashaadka Waxbarashada iyo Tababaradda	-	-	280,000	0%
2242	Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta	-	36,000	36,000	0%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	42,810	513,840	1,462,500	8%
	<b>Soo Iibsasho Hantida aan Maaliyadda ahayn</b>	<b>-</b>	<b>915,675</b>	<b>915,675</b>	<b>0%</b>
3111	Dhismooyinka iyo Qaabdhismeedka	-	885,675	885,675	0%
3112	Qalabka iyo Mashinadda	-	30,000	30,000	0%
3113	Hantida kale ee Maguurtada ah	-	-	-	0%
<b>0102012</b>	<b>Lower House Parliamentary Core Business</b>	<b>1,756,280</b>	<b>21,346,830</b>	<b>1,362,240</b>	<b>8%</b>
	<b>Mushaarka Shaqaalaha</b>	<b>1,558,000</b>	<b>18,763,200</b>	<b>-</b>	<b>8%</b>
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	-	-	-	0%

Madaxa	Faahfaahinada	Dhabta Jan-Feb	Isbadalka Miisaniyadda ee Kala wareejimaha	Kutalagalka Miisaaniyadda	%
2113	Gunnoyin Lacag Cadaan ah	1,558,000	18,763,200	-	8%
2114	Kharshaadka kale ee Shaqaalaha	-	-	-	0%
	<b>Isticmaalka Agabka iyo Adeegga</b>	<b>198,280</b>	<b>2,583,630</b>	<b>1,362,240</b>	<b>8%</b>
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	52,980	720,000	157,500	7%
2221	Hawlaha Guud	-	-	-	0%
2222	Isgaarsiinta	-	-	-	0%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	-	-	245,760	0%
2224	Agabka iyo Alaabaha	-	-	117,600	0%
2241	Kharashaadka Waxbarashada iyo Tababaradda	-	120,090	46,500	0%
2242	Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta	-	-	-	0%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	145,300	1,743,540	794,880	8%
<b>010202</b>	<b>Xafiiska Aqalka Sare</b>	<b>587,430</b>	<b>7,973,196</b>	<b>7,973,196</b>	<b>7%</b>
<b>0102021</b>	<b>Governance and Administration (Senate)</b>	<b>205,022</b>	<b>4,274,696</b>	<b>5,139,396</b>	<b>5%</b>
	<b>Mushaarka Shaqaalaha</b>	<b>78,672</b>	<b>1,905,696</b>	<b>1,905,696</b>	<b>4%</b>
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	13,245	161,280	161,280	8%
2113	Gunnoyin Lacag Cadaan ah	65,427	1,744,416	1,744,416	4%
2114	Kharshaadka kale ee Shaqaalaha	-	-	-	0%
	<b>Isticmaalka Agabka iyo Adeegga</b>	<b>126,350</b>	<b>1,609,800</b>	<b>2,474,500</b>	<b>8%</b>
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	30,000	393,600	393,600	8%
2221	Hawlaha Guud	12,300	147,600	147,600	8%
2222	Isgaarsiinta	-	-	-	0%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	22,250	267,000	267,000	8%
2224	Agabka iyo Alaabaha	21,600	259,200	244,800	8%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	2,000	36,000	34,200	6%
2231	Kirooyin	16,200	194,400	194,400	8%
2241	Kharashaadka Waxbarashada iyo Tababaradda	-	-	-	0%
2242	Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta	-	48,000	48,000	0%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	22,000	264,000	1,144,900	8%
	<b>Soo Iibsasho Hantida aan Maaliyadda ahayn</b>	<b>-</b>	<b>759,200</b>	<b>759,200</b>	<b>0%</b>
3111	Dhismooyinka iyo Qaabdhismeedka	-	703,200	703,200	0%
3112	Qalabka iyo Mashinada	-	-	-	0%
3113	Hantida kale ee Maguurtada ah	-	56,000	56,000	0%
<b>0102022</b>	<b>Upper House Parliamentary Core Business</b>	<b>382,408</b>	<b>3,698,500</b>	<b>2,833,800</b>	<b>10%</b>
	<b>Mushaarka Shaqaalaha</b>	<b>309,000</b>	<b>2,817,600</b>	<b>2,817,600</b>	<b>11%</b>
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	-	-	-	0%
2113	Gunnoyin Lacag Cadaan ah	309,000	2,817,600	2,817,600	11%
2114	Kharshaadka kale ee Shaqaalaha	-	-	-	0%
	<b>Isticmaalka Agabka iyo Adeegga</b>	<b>73,408</b>	<b>880,900</b>	<b>16,200</b>	<b>8%</b>
2224	Agabka iyo Alaabaha	-	-	14,400	0%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	-	-	1,800	0%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	73,408	880,900	-	8%
<b>010300</b>	<b>Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha</b>	<b>895,931</b>	<b>11,317,156</b>	<b>11,062,156</b>	<b>8%</b>
